

TALLAALADA COVID-19: SAMAYNTII IYO AMNIGII

030321 INGIIRIISI

Samaynta tallaala waxa ay qaadan kartaa sannado. Iyadoo sidaa ah, tallaaladii ugu horreeyay ee COVID-19 waxa ay kusoo bexeen muddo ka yar sannad markii la aqoonsaday fayraska sababaya COVID-19. Sidee ayaa ay taasi ku dhacday?

Waxaa mihiim ah in la ogaado in tallaaladu ay dhammaystireen dhammaan tallaabooyinka lagu tijaabinayo laguna hubinayo amnigooda. Waxba lagama boodin.

Tallaalada COVID-19 waxa ay marayaan dhammaan tallaabooyinkii caadiga ahaa si loo ansixiyo tallaal – cilmi baadhis, saddex marxaladood oo tijaabo, dib u eegis taxaddar leh iyo ansixino badan.



Markan, wadashaqaynta ka dhaxaysa cilmibaadhayaasha, dawlada federaalka iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ayaa yareeyay wakhtiga kana yareeyay wakhtigii caadi ahaan lagu soo saari jiray. Halkan waxaa ku xusan qaar ka mid ah sababaha ay markan soo saarista tallaalada COVID-19 ay uga dhakhsiyo badnayd:

- **Cilmi baadhayaashu waxa ay haysteen bilaw fiican.** Dedaalka soo saaridda tallaalka COVID-19 waxa uu ka taabbo qaatay cilmi baadhisyo dunida oo dhan ah oo laga sameeyay karoona-fayraska (gaar ahaan fayrasyada SARS iyo MERS) iyo horumarro laga sameeyay tiknoolojiyadda tallaalka.
- **Maalgelintu diyaar ayaa ay ahayd.** Mararka qaar in lacag lagu maalgeliyo diraa-sooyinka tallaal la helaa waxa ay qaadan kartaa wakhti badan. Marka ay noqoto tallaalka COVID-19, dawlada federaalku waxa ay bixisay lacag badan markiiba si loogu maalgeliyo dedaalka soo saarista tallaalka.
- **Diraa-sooyinku mar ayaa ay wada socdeen.** Cilmi baadhayaashu waxa ay u qaateen dad dhammaan marxaladaha kala duwan ee diraa-sooyinka caafimaad wakhti keliya oo isku mid ah. Iyadoo ay qayb ahaan sabab u ahayd maalgelinada dheeraadka ahi, waxa ay awoodeen inay dhammaan marxaladaha diraa-sada mar wada sameeyaan halkii ay midba midka kale ku xigsiin lahaayeen.
- **Soo saariddu waxa ay bilaabantay xilli hore.** Iyadoo ay taageerayso caawimo laga helay dawlada federaalka, wax soo saarayaashu waxa ay bilaabeen inay sameeyaan oo ay baakadeeyaan tallaalada iyagoo markaasi weli diraa-sooyinkii caafimaad ay socdaan.
- **Caqabadihii sharci oo yaraa.** Tallaalada cusub ee COVID-19 waxa lagu ansixiyay Oggolaanshiyaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA) oo ay ka heleen FDA da. Tani waxa ay qaadataa wakhti kayar caadi ahaan marka la barbardhigo qaabka ansixinta caadiga ah. Kooxaha iyagu heerka federaal ahi ma oggolaanayaan waxna inay ka habsaamiyaan qiimaynta tallaalada. Tusaale ahaan, FDA da waxa ay korodhsatay shaqaale badan si ay u soo yarayso qaabka qiimaynta ugana soo yarayso bilo oo uga dhigto todobaadyo.
- **Badqabkaa u horreeya.** Tallaalku waxa kaliya la ansixin karaa haddii diraa-sooyinku caddeeyaan inuu ammaan yahay isla markaasina uu shaqaynaayo. Markastoo ay dad badani qaataan tallaalka, FDA da iyo CDC da waxa ay ururin doonaan xog ku saabsan tallaalka waxayna sii wadi doonaan inay sii diraa-seeyaan sida fiican ee ay u shaqaynaayan.
- **Tallaalada diraa-sadu waa ay shaqeeyeen.** Maadaama oo COVID-19 uu aad ufaafay, saynisyahanadu waxa ay si fudud ula soo bixi karaan tirada dadka la siiyay tallaalka ee uu ku dhacay COVID-19 oo ayna barbardhigi karaan tirada dadka aan qaadan tallaalka ee qaaday xanuunka.



Ka raadi websaytka degmada "COVID-19" sii aad u hesho xog maxalli ah.



Tallaabooyinka Samaynta Tallaalka COVID-19

Diraasooyinka Caafimaad ee Tallaalka

Qiimaynta Xogta Badqabka ee Tallaalka

Tallaal ayaa La Sameynayaa



Cilmi Baadhis
La sameeyay iyadoo la isticmaalaayo dirasooyinkii hore ee karoonaafayrasyada kale.




Marxalada 1 ee Diraasada Caafimaad
Miyaa uu yahay tallaalku mid ammaan ah?
Marxalada 2 ee Diraasada Caafimaad
Tallaalku ma shaqaynayaa?
Marxalada 3 ee Diraasada Caafimaad
Tallaalku miyaa uu yahay mid ammaan ah oo miyuu shaqaynayaa?
MarxaladaHA dirasoada caafimaad waa uu is galay wakhtigoodu.



Qiimaynta FDA da
FDA du waxa ay eegtay xogta waxayna bixisay Oggolaanshiyaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA) si loo isticmaalo tallaalka.



Qiimaynta Advisory Committee on Immunization Practices (ACIP)
Waxa ay ka talo bixiyeen cidda ay tahay inay qaadato tallaalka.



Soo saarka
Soo saarku waxa uu bilaabmay xilli hore, markii qiimeynada iyo ansixinadu ay socdeen.

Kooxda Shaqo ee Qiimaynta Badqabka Sayniseed ee Gobolada Galbeedka
Qiimeeyeen amniga iyo waxtarka. (Oregon, Washington, California, Nevada)

Waxa inoo hadhay waxyaalo badan oo ay tahay inaynu barano

Diraasooyinka tallaalku waa kuwo socda xog waqici ahna waa lagusoo kordhinayaa waxa aynu hore uga ognahay dirasooyinka. Xogta illaa taariikhdan la hayo waxa ay sheegaysaa in tallaalkadu ay aad ammaan u yihiin waxtarna u leeyihiin. Waxa weli jira waxyaalo aynu ubaahanahay inaynu ka barano tallaalka COVID-19:

- Muddo intee leeg ayaa ilaalinta uu tallaalku kaa ilaalinayo cudurka ay jiraysaa?
- Dadka tallaalani weli ma qaadsiin karaan cudurka dadyawga kale?
- Isbedellada fayraska ku dhacayaa ma waxa ay micnahoodu tahay in tallaalo cusub loo baahan doono in la sameeyo sannadada soo socda?
- Miyaa ay jiri doonaan saamayno xunxun oo dhif ah oo aynu ka ogaan doono tallaalka marka malaayiin dad ah la tallaalo? *Haddii saamaynaha xunxun ee dhif iyo naadirka ahi dhacaan (sida kuwii soo baxay Abriil ee la xidhiidhaayay Johnson & Johnson), nidaamka qiimeynta iyo wergelinta ayaa u oggolaanaya saynisyahanada inay si dhakhso ah u aqoonsadaan tallaabona u qaadaan.*

Kuwani dhammaan waa su'aalo fiican oo ubaahan diraso dheeraad ah. Laakiin ma aha sababo ay tahay in dib loogu dhigo gaadhsiinta tallaalka kanoo ah ammaan waxtarna leh dadka isla hadda.

Waxa aad qabi kartaa su'aalo iyo dareemo isku jira

Waxa laga yaabaa inaad rajo weyn ka qabtid tallaalkada iyo ka ilaalinta saaxiibadaa iyo qoyskaaga inay qaadaan COVID-19. Waxa laga yaabaa inaad ka werwersan tahay inaad qaadato tallaalka laftigaagu. Haddii aad tahay qof aan midabkiisu caddayn, waxa laga yaabaa inaad isweyddinayso inaad ku kalsoonaan kartid tallaalkada nidaamka caafimaad oo markaasi iyagu kalsoonida bulshadaada hore uwaayay. Waa mid la fahmi karo inaad walaacyo qabtid. Baro wax dheeraad ah oo hel taageero:

- Booqo multco.us/covid-vaccine si aad u hesho xog dheeraad ah.
- La hadal dhakhtarkaaga ama xaruntaada caafimaad. Haddii aanad lahayn dhakhtar, wac 2-1-1 ama Multnomah County Primary Care Clinics: 503-988-5558
- Wac ama booqo Oregon Statewide Safe + Strong Helpline si aad u hesho taageero dareen iyo ilogudbineed. Uma baahnid inaad ku jirto xaalad qalalaase ah. 1-800-923-HELP (4357), linesforlife.org/obhsl/